



San Diego Unified School District

EUGENE BRUCKER EDUCATION CENTER
4100 Normal Street, San Diego, CA 92103-2682

(619) 725-5506

Noofember 2007

Carl A. Cohn
Madaxa Waxbarashadda Dugsiyada

Mudane Waalidiin ama Dadka ardeyda masuulka ka ah:

Maadaama aan dugsiga ku soo laabaney kedib dabkii masiibada ahaa uu inagu habsadey, waxaan jecelahay inaan idin xusuusiyo in dugsiyada San Diego Unified ay u heellan yihiin inay ardeydu helaan jawi nabadgelyo leh oo wanaagsan, si ay waxabarashadda ugu guuleystaan. Halkan waxaan idin kula socodsiiyeynaa tallaabooyinka aan qaadney si ay ilmuhu u helaan ba'yada nabadgelyo leh oo ay wax ku bartaan.

- Dugsiyada San Diego Unified School District waxaa ka shaqeeya 45 booliiska dugsiyada ah iyo 26 ah saraakiisha beesha, kuwaas oo ka shaqeeya dugsiyada hoose, dhexe iyo sare. Booliiskaasu wuxuu si joogto ah ardeyda tababar ugu siiyaa siyaabaha loola macaamiiltemo marka ay xaalad kasta la soo gudboonaato.
- Dugsi kasta wuxuu dejiyaa oo qoraa qorshaha badbaadada dugsiga, kaas oo sii sharaxaya nidaamyada xaalada deg degga ah, siyaabaha masiibooyinka looga gaashaanto iyo siyaabaha loo maareeyo marka ay ardeyda iyo shaqaalaha soo wejahdo arrimo nabadgelyadooda khatar gelineya. Dugsiyadu waxay ardeyda ku tababaraan gambileel la yeedhiyo si ay fasalada uga baxaan, taas oo ay metelayaan siyaabihi ay yeeli lahaayeen marka ay xaalad deg deg ah timaado.
- Waalidiinta Dugsiyada Kormeerka ku sameeya waxay ka koobn yihiin waalidiinta, shaqaalaha iyo dad iskaa-wax-u-qabso ku shaqeeya oo ka tirsan jaaliyada. Dadkaas waxaa tababara Qeybta Ka Hortegga Dembiyada ee Booliiska Dugsiga, waxayna isha ku hayaan marka uu ilmahaagu dugsiga soo gelayo.
- Waxaa jira Ka Hortegayaasha Demiyada ee Dhismaha (Campus Crime Stoppers), kuwaas oo si jaalnimo ah ula shaqeeya San Diego County Crime Stoppers, si ay ardeyda iyo waalidiinta u siiyaan ikhtiyaariyada ku saabsan nabadgelyada iyo abaalmarin la siiyo marka ay dembi ka soo warbixiyaan.
- Xafiisyada la-taliyaasha dugsiyada sare waxay tababaraan ardeyda kuwa qeykooda ah la taliya iyo siyaabaha khilaafyada iyo iska-hor-imaadka loo dhexdhexaadiyo. Waxaa kale oo dugsiyada ka jira kooxo ardeyda ka caawiya siyaabaha cadhada loo maareeyo, iyo siyaabaha looga horteggo falalka rabshadaha keenaya.

Dadaalka badan ee aan sameynay darteed dugsiyadeennu maanta waa kuwo nabadgelyo leh. Waxbarashadda degmada saamiga falalka dembiyadii ka dhici jirey mar kasta wey sii yaraadaan. Si aan arrintaas halkaas uga sii wadno waxaan u baahanahay inaad na caawisaan oo aad na taageertaan.

Waxaan idin ku dhiirigelineyaa inaad ilmihiiinna kala hadashaan Nidaamka Waxyaabaha Aan Loo Dulqaadan Karin ee Waxabarashadda Degmada u dejisan. Waxaad ilmaha u sheegtaa inaad taageersan tahay sharciyada iyo nidaamka u dejisan dugsiga si ay dhammaan ardeydu nabadgelyo u helaan. Waxaad qeyb firfircoon ka qaadataa hawlaha dugsiga ilmahaagu dhigto ka socda, waxaad barataa arrimaha ku saabsan nabadgelyada dugsiga, iyo qorshaha ka hortegga masiibooyinka. Waxaad noqotaa qof wanaagga lagaga dayan karo.

Dadaalka aad u geshaeen inuu ardey kasta helo fursad uu wax ku barto waad ku mahadsan tihiin.

Si Daacadnimo ah,

Carl A. Cohn
Madaxa Waxbarashadda Dugsiyada

Fadlan. Xusuusnow, Inay dugsiyadu xidhnaan doonaan toddobaadka Noofember 19–23, ciidda Shukri-naqa darteed. Toddobaad wacan oo nasasho leh ayaan idiin rajeynaynaa.

Somali version: 11 Nov07 PTA Ltr